

Maansada Gaax jacayl W/C: Sacdiyo Maxamuud Garcadde



Maansada Gaax jacaylMaansadan waxaa curisay Sacdiyo Abwaan Maxamuud Garcadde, waa maanso ka hadlaysa dulqaadka iyo gigsashada dareenka jacaylka markuu dego wadnaha ee qofka ku keliyeysto iyo marka lala wadaago ee dib ugu guuleysto, bogasho wacan. Jaceylkaan gu'yaal badanGuudkeyga saartooLa gucleeyey kaligeeyGadgaddoonka jiiifkiyoUga go'ay hurdada badi.Gacal kaan u moodiyoGeesigaan jeclaadaneAsoon garab i siineynLa guhaadey kaligeey. Muddo waxaan goohoIlmo goomahegyiyoGaadadeyda qooyaaIga goba' tiraahdabaTiiraanyo gubaysaaKeli aan la guuxabaGarashiyo garowgaaGacal iyo walaalnimoLagu kala gudboon yahay. Galad eebbe weeyaanWaa guulle mahadiisHaddaan caawo soo galeyGogol raaxo taalliyoGurigii negaadiga. Galad eebbe weeyaanGaawihii marnaa iyoHashii iga gurneydeGu'yaal aan dhursagayeyHaddii godol irmaantoAan maaley gaaxdi. Galad eebbe weeyaanGeesigaan jeclaadoonUga go'ay raggoo idilHaddii ow garwaaqsadeyInow gacan isiiyiyoGaaf iyo aroosiyoAan guri yagleeyo. Adna geesigeygowAboowow garaadkiyoGarashiyo dadnimadaadAsagaa ku gudubtooAan kugu gacloodayeAmmaan gaara iga hoo. Adaa ii gurmadayooDhibaatadii i gaartiyoJaceylki I gaasireyAan la gabi-dhacleeyooLa galuubtey kaligeeyIga siiyey garabkeGooni ila faqayeeeeeGuullaha ilaaheyGooh iyo dhib dhawrGuryo samo ku noolowDadku gacalo kuu noqoyKuma gooyo cadawguneGeed bira ha kaa dhigoFarxad aanan guureynAbidkeed gureyn hano W/C: Sacdiya Abwaan Maxamuud Garcadde.